



## Ilaahay baa dhulka qabanaaya, samooyinkana midigtiisuu ku laa-laabayaa, ka dibna wuxuu dhahayaa: Anaa boqora ee aaway boqorradii dhulku

Abii Hurayra -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay - naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- isagoo dhahaya: Ilaahay baa dhulka qabanaaya, samooyinkana midigtiisuu ku laa-laabayaa, ka dibna wuxuu dhahayaa: Anaa boqora ee aaway boqorradii dhulku."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu sheegay inuu Ilaahay maalinta qiyaamah dhulka qaban doono iskuna ururin doono, samadana midigtiisa ku laa-laabi doono, samo walbana mid kale ku laabi doono, oo uu baabi'in doono, wuxuuna dhihidoonaa: Anaa boqora ee aaway boqorradii dhulku?!

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65028>

